

Barnaamijka Gurmada Abaaraha Beeraha (ADRoP) 2021

Barnaamijka Gurmada Abaaraha 2021 (ADRoP) waxa uu dib ugu soo celinayaa beeralayda xoolaha Minnesota iyo kuwa wax soo saarka dalaga gaarka ah kharashaadka la xiriira abaarta 2021. Beeralayda iyo wax soosaarayaasha xaqa u leh ayaa waxay heli karaan ilaa \$7,500 ee kharashaadka dhabta ah ee ay galeen wixii ka dambeeyey Juun 1, 2021 iyo kahoreeyey Maajo 23, 2022. Hal arji oo kaliya ayaa loo aqbali doonaa hawlgalkiiba, oo ay ku jiraan beero dhaqda xoolaha iyo beera dalagyada gaarka ah.

Waxaa jira saddex siyaabood oo aad arjigaaga ugu soo diro karto Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA):

- TAN LA DOORBIDAYO: Ku soo gudbi khadka internetka adiga oo gujinaya "Apply Online" ("Ku Codso Khadka Internetka") link-ga www.mda.state.mn.us/droughtrelief droughtrelief (waa in la helo ugu dambayn Luulyo (July) 6, 2022 5:00 pm)
- Email ugu soo dir drought@state.mn.us (waa in la helo ugu dambayn Luulyo (July) 6, 2022 5:00 p.m.)
- Boostada ugu soo dir ciwaanka ku yaalla Bogga 3 (waa in boostadu qaabishay ugu dambayn Luulyo 6, 2022 oo la helo Luulyo 12, 2022)

Dhammaan qaybaha arjigaaga waa in la helo kahor wakhtiga kama dambaysta ah si loo tixgelinayo. Arjiyada emailka iyo boostada la soo diray waa inay wataan saxeex. Waxaanu kugu dhiirgeliyaynaa inaad sida ugu dhakhsaha badan u codsato.

Macluumaadka Codsadaha/Beerta		
Magaca Koowaad:	Magaca Dambe:	
Cinwaanka Emailka:	Lambarka taleefanka:	
Magaca Beerta (<i>haddii uu jiro</i>):	Magaalada Beerta:	
Degmada Beerta: <i>(Haddii ay yihiin wax ka badan hal, dooro degmada xaqa u leh ee aad ka shaqayso badanaa. Hawlgalada degan degmooyinka Goodhue, Rice, Wabasha, iyo Winona uma qalmaan.)</i>		
Ciwaanka Boostada (<i>Waa in uu waafaqo Foomka IRS Form W-9</i>):		
Magaalada:	Gobolka:	Zip Code:

Foomka IRS Form W-9			
Buuxi foomka IRS Form W-9 Waa inaad soo buuxiso sanduudiyada 1, 2, 3, 5, iyo 6, oo ay ku jiraan lambarkaaga sooshal sekuuratiga ama lambarka aqoonsiga loo shaqeeyaha, oo aad saxeexo oo aad taariikhda ku qorto xagga hoose. Foomka waxaa laga heli karaa www.irs.gov/pub/irs-pdf/fw9.pdf or DocuSign .			
Nooca Hawlgalka			
Hawlgalkaygu waa:	Beerta Xoolaha	Beerta Dalag Gaar ah	Dhaqashada Xoolaha iyo Dalag Gaar ah
Faahfaahinta Kharashka			
Buuxi shaxda hoose, adigoo shay-shay u qeexaya kharashaadka aad ku bixisay abaarta wixii ka dambeeyey Juun 1, 2021 iyo kahoreeyey Maajo 23, 2022. Ku dar bog dheeraad ah haddii loo baahdo. Kharashyadu waa inay si toos ah ula xiriiraan abaarta oo marka lagu daro kharashyada caadiga ah (tusaale ahaan, calafka xoolaha/quudinta iyo shaqaalaha la kiraysto waxay xaq u yeelan karaan oo keliya haddii tiradu ay ka badan tahay waxa aad caadi ahaan u soo iibsato ama u kireysato sannad aan abaar ahayn.)			
Taariikhda	libiyaha	Faahfaahinta Agabka/Adeegyada	Qiimaha

Gaadiidka Keliya: Kharashaadka kor ku xusan ka sokow, waxaan u dhaamin jiray biyo, xoolaha ayaan geynayey meesha ay soo daaqayaan, daaqa ayaan u keenayey xoolaha, ama xoolaha ayaan gaynayey halka lagu iibinayey xilliyada soo socda:

Taariikhda	Maylka rarka aad wado (qiimaha masaafada \$6/maylkiiba) Calafka Xoolaha: Tan waxaa ku jira maylasha si aad xoolaha ugu keentoo quudinta ama in aad qaado xoolaha si ay u soo daaqaan (waxay ku xaddidan tahay 25 mayl ee hore). Inta mayl ee xoolaha loo safriyey si loo geeyo goob lagu quudiyo xaq uma leh. libka: Gaadiid ku safrinta xoolaha lagu gaynayo halka lagu iibinayo waxay xaq u yeelanaysaa safarka uu rarnaa oo dhan. Tan waxa ku jira oo kaliya xoolihii aad iibisay abaarta awgeed. Biyaha: Tan waxaa ka mid ah in biyaha loo dhaamiyo xoolaha ama biyaha in loo soo dhaamiyo waraabka dalagyada gaarka ah.	Ujeedada (aaqa, iibka, ama biyo)

Waxaan xaqiijinayaa inaan magdhow la igu siinin Caawinta Xaaladaha Degdegga ah ee USDA ee loogu talagalay Xoolaha, Shinida Malabka iyo Barnaamijka Kalluunka Beeraha 25-ka mayl ee ugu horreeya mid kasta oo ka mid ah safaradan. Haa Maya

Qiraalka iyo Markhaati furka

Waa in aad calaamadiso mid kasta oo ka mid ah sanduuqyadan soo socda si aad u caddayso in aad buuxisay dhammaan u qalmitaanada oo aad fahamtay shuruudaha barnaamijka.

Waxaan caddaynayaa inaan ahay maamulaha howlgeliya ama in aan awood u leeyahay inaan codsado anigoo ku hadlaya magaca beerta oo aysan jirin arji kale oo laga soo dirayo beertan.

Waxaan qirayaa in aan buuxiyey qeexida USDA ee beeralay ahaanta oo aan dhaqdo xoolo ama aan beero dalagyo gaar ah. Beertu waa meel kasta oo laga soo saaro lagana iibiyo \$1,000 ama in ka badan oo wax soo saarka beeraha ah, ama sida caadiga ah laga iibin lahaa, sanadka dhexdiisa.

Waxa aan caddaynayaa in kharashayada aan kor ku soo xusay ay ku baxeen duruufo abaareed ama u diyaargarowga saamaynta abaarta oo ay si toos ah ula xiriireena wax soo saarka xoolaha ama dalagyada gaarka ah.

Sida uu qabo xeerka Minn. Stat. § 270C.65, Qayb-hoosaadka 3, iyo sharciga kale ee lagu dabaqi karo, waxaan fahamsanahay in lambarkayga Sooshal Sakuuradka, lambarka aqoonsiga canshuurta loo shaqeeyaha ee federaalka, iyo/ama lambarka aqoonsiga canshuurta Minnesota ee aan horay u siiyey Gobolka, ay isticmaali karaan wakaaladaha canshuuraha ee federaalka iyo gobolku iyo shaqaalaha kale ee gobolka ee ku lug leh waajibaadka lacag bixinta gobolka. Lambaradan aqoonsiga waxaa loo isticmaali karaa fulinta sharciyada canshuurta federaalka iyo gobolka taas oo keeni karta ficil u baahan xaraynta canshuur celinta gobolka iyo bixinta deymaha canshuurta gobolka ee lala dib dhacay, haddii ay jiraan.

Sida loogu baahan yahay xeerka Minn. Stat. § 16B.98, Subd.8, Waxaan ogolahay in aan hayo dhamaan diiwaanada iyo rasiidhada la xiriiraa oo aan ka dhigo kuwo ay heli karaan MDA, Hantidhawrka Gobolka, ama Hantidhawrka Sharci Dejintu ugu yaraan lix sanadood.

Waxaan qirayaa in aan akhriyay oo aan aqbalay Ogeysiiska Asturnaanta ee ku yaalla bogga 4.

Waxaan caddaynayaa in macluumaadka aan soo gudbinayo uu yahay run, dhamaystiranyahay, oo sax yahay.

Soo koobid

Waa inaad MDA u gudbiso waxyaabaha soo socda si arjigaaga loogu tixgeliyo inuu dhammaystiran yahay:

Foomka codsiga dhammaystiran oo saxeexaagu ku jiro.

Foomka IRS W-9, oo saxeehan oo taariikhaysan (www.irs.gov/pub/irs-pdf/fw9.pdf ama [DocuSign](#)).

Halkan calaamadi haddii aad ku soo dirtay Foomka IRS Form W-9 adiga oo adeegsanaya [DocuSign](#) halkii aad ku soo lifaaqi lahayd arjigan.

Saxeexa Codsadaha

Saxiixa:

Taariikhda:

Waa maxay Barnaamijka Gurmadka Abaaraha Minnesota ee Beeralayda Wax Soo Saarka Xoolaha iyo Dalaga Gaarka ah?

Barnaamijka Kharash-wadaaga ee Gurmadka Abaaraha 2021 waxa uu dib ugu soo celinayaa beeralayda xoolaha Minnesota iyo kuwa wax soo saarka dalaga gaarka ah kharashaadka si toos ah ula xiriira abaarta 2021. Maalgelinta barnaamijkan waxa lagu diyaariyey u qoondaynta sanduuqa guud ee gobolka. Beeralaydu waxay codsan karaan ugu badnaan ugu badnaan \$7,500 kharashaadka dhabta ah ee ay galeen wixii ka dambeeyey Juun 1, 2021 iyo kahoreeyey Maajo 23, 2022.

Yaa codsan kara?

Hawl-wadeenada maamulaha ah ee xoolaha iyo beeraha dalagyada gaarka ah ayaa xaq u leh inay codsadaan. Beertiiba hal codsi ayaa laga aqbali doonaa.

- **Beertu** waa meel kasta oo laga soo saaro lagana iibiyo \$1,000 ama in ka badan oo wax soo saarka beeraha ah, ama sida caadiga ah laga iibin lahaa, sanadka dhexdiisa. Qeexitaan waxaa ka mid ah goobaha xanaanada dhirta, dhismayaasha wax lagu dhex beero (greenhouses), iyo qaar ka mid ah ururada aan faa'iido doonka ahayn ee ka shaqeeya beeraha.
- **Hawl-wadeenka maamulaha ah** waa qofka aasaasi ahaan masuulka ka ah hawl-maalmeedka beerta.
- **Xoolaha** waxaa ka mid ah lo'da hilibbka, lo'da caanaha, doofaarka, digaaga, riyaha, baqlaha, lo' gisida, idaha, fardaha, Deerada la dhaqdo (deero), Shimbiraha (shimbiraha aan duulin oo ay ku jiraan emu), iyo llamas.
- **Dalaga gaarka** ah macneheedu waa dalaga u qalma sida uu qabo barnaamijka Deeqda Kooxda Dalaga ee Wasaarada Beeraha ee Maraykanka.

Beeruhu waa inay ku yaaleen gebi ahaan ama qayb ahaan degmo ay USDA u iclaamisay aagga musiibada dabiiciga ah kadib Luulyo 19, 2021 iyo kahor Janaayo 1, 2022, ama degmo dhul ahaan ugu dhegan degmo loo iclaamiyey. Tan waxaa ku jira dhammaan degmooyinka Minnesota marka laga reebo Winona, Wabasha, Goodhue, iyo Rice.

Sideen u codsadaa?

Waxaa jira saddex siyaabood oo aad arjigaaga ugu soo diro karto MDA:

- TAN LA DOORBIDAYO: Ku soo gudbi khadka internetka adiga oo gujinaya "Apply Online" ("Ku Codso Khadka Internetka ") link-ga www.mda.state.mn.us/droughtrelief (waa in la helo ugu dambayn Luulyo 6, 2022 5:00 pm)
- Email ugu soo dir drought@state.mn.us (waa in la helo ugu dambayn Luulyo 6, 2022 5:00 pm)
- Boostada ugu soo dir Minnesota Department of Agriculture, Agricultural Drought Relief Program, 625 Robert St N, Saint Paul, MN 55155 (waa in boostadu qaabishay ugu dambayn Luulyo 6, 2022 oo la helo Luulyo 12, 2022)

Si loogu tixgeliyo in uu dhammaystiranyahay, waa inaad ku soo darto arjiga oo la buuxiyay iyo foomka IRS Form W-9. Arjigaaga waxa loo tixgalin doonaa in uuna dhammaystirnayn haddii labada shayba aan lagu soo darin. Codsadaayaasha waxaa aad loogu dhiirgelinayaa inay khadka internetka ku codsadaan oo ay socsadaan kahor wakhtiga kama dambaysta ah.

MDA masuul kama aha wixii dhibaato farsamo ama qabanqaabada ah ee keenta in MDA ayna arjiga ku helin wakhtigii loogu talagalay. Waa mas'uuliyada codsadaa in uu hubiyo in soo gudbinta ay MDA heshay kahor wakhtiga kama dambaysta ah. Waxaa hab dhaqan wanaagsan in aad arjigaaga soo gudbiso ugu yaraan 24 saacadood kahor si looga hortago daahitaan lama filaan ah.

Arjiyadiyada la soo gudbiyay taariikhda kama dambaysta ah ee hore kadib waxaa la tixgalin doonaa kaliya haddii lacag ay soo harto. Arjiyadan waxa loo howlgelin doonaa hab ku salaysan in looga shaqeeyo sida ay u soo kala horreeyaan.

Waa maxay noocyada kharashyada ee u qalmaa?

Kharashyada waa in lagu iibsaday oo la bixiyay Juun 1, 2021 kadib, iyo kahor Maajo 23, 2022. **Kharashku waxa uu xaq u leeyahay oo kaliya haddii ay ku baxeen abaarta darteed oo kaliya, oo aadan bixin lahayn haddii aysan abaari jirin.**

Liisaska soo socda lama filayo inay noqdaan kuwo ay ku wada dhan yihiin. Haddii aad haysato kharashyo aan halkan ku qornayn, fadlan la xiriir Kooxda ADROp si aad u hesho caddayn.

- **Dalaga Gaarka ah:** Qalabka biyaha lagu maamulo sida haamaha biyaha, dhuumaha, gaadhiyada/tareellada biyaha; biyo dhaaminta; ceelasha (cusub, hagaajin, dayactirka, beddela baamka); qalabka waraabka oo ay ku jiraan waraabka tuubada faleebada; qalabka dareemayaasha qoyaan-ka ciidda; afka tuubada waraabka; beddelka abuurka dalaga gaarka ah, geedaha dhallaanka ah, ama dhirta la bilaabay (ay ku jiraan u diyaarinta goobta, dib u beerista, iyo kaalmada farsamada); cawska/bacda dhulka la saaro oo dheeraad ah; kiraysiga shaqaale dheeraad ah; khidmadaha dheeraadka ah ee suuqa beeralayda ee ka yimid in beeralaydu ayna dalag haynin
- **Xoolaha:** Qalabka biyaha lagu maamulo sida haamaha biyaha, dhuumaha, gaadhiyada/tareellada biyaha; biyo dhaaminta; ceelasha (cusub, hagaajin, dayactirka, beddela baamka); qalabka waraabka; tijaabinta nitrate-ka; qaadista calafka xoolaha/quudinta, duubista cawska, kirada qalabka; kaydinta calafka xoolaha iyo maaraynta saadka sida tuubooyinka kaydinta iyo isku-dariyeyaasha TMR; gaadiidka xoolaha; qodista balliga xoolaha; dalagyada daboolida dhulka, daaqa, ama dib u beerista daaqa; (oo ay ku jiraan abuurka, diyaarinta goobta, iyo kaalmada farsamada); dayrka iyo sida tiirasha, waayirada, jaajarada cadceeda; xuquuqda daaqa; kiraysiga shaqaale dheeraad ah; kharashyada dhimista tirada xoolaha

Beeralayda xooluhu waxa ay heli karaan ilaa \$6/maylkiiba ay rarka wadaan (ilaa 25 mayl safarkiiba) ee ay calafka xoolaha/quudinta u geynayaan xoolaha. Beeralayda xooluhu waxa kale oo laga yaabaa inay helaan \$6/maylkiiba ay rarka wadaan ee ay xoolaha geynayaan meesha ay soo daaqayaan. Maylka dib loogu celinayo xoolaha halkii ay ka yimaadeen xaq uma leh. Ma sheegan kartid maylasha masaafada haddii isla maylashaas lagu bixinayo Caawinta Xaaladaha Degdegga ah ee USDA ee loogu talagalay Xoolaha, Shinida Malabka iyo Barnaamijka Kalluunka Beeraha. Beeralayda xooluhu waxa kale oo laga yaabaa inay helaan \$6/maylkiiba ay rarka wadaan ee ay xoolaha geynayaan meesha lagu iibinayo. Tan waxa weeyaan keliya xoolaha aan la iibin lahayn haddii aysan abaari jirin.

Beeralayda xoolaha iyo beeralayda dalagyada gaarka ah waxa kale oo laga yaabaa inay helaan \$6/maylkiiba ay rarka wadaan ee ay biyaha u soo dhaamiyaan xoolaha ama ay biyaha u soo dhaamiyaan waraabka dalagyada gaarka ah.

Lacagahan looma isticmaali karo in lagu ladho barnaamijyada deeqaha gobolka midna.

Waa Maxay Kharashaadka aan Marnaba u Qalmin?

- Dhisitaanka ama hagaajinta ka baxsan Gobolka Minnesota
- Cuntooyinka/cuntada dadku cunaan
- Adeegyada deeqda ah ama tabaruaadka ah (deeqda) iyo shaqada aan mushahar lagu bixin
- Wax siinta deeqaha iyo tabaruaadka ah, ee ay ku jiraan hantida iyo adeegyada, ee uu bixiyo codsadhaha (iyada oo aan loo eegin qofka uu siiyey)
- Ganaaxyada, ganaaxyada ciqaabta, iyo kharashyada kale oo xalinta ah ee ka dhashay ku guuldaraysiga in codsaduhu uu u hoggaansamo shuruucda iyo xeerarka Federaalka, Gobolka, deegaanka, ama Hindida Qabaa'ilka
- Sharci jebinta baarkinka ama xadgudubyada gaadiidka
- Deynta xumaaatay, khidmadaha lacag bixinta lala daahay, kharashyada maaliyadeed, kharashyada sharciga, ama lacagaha loogu talagalay xaaladaha lama filaanka ah
- Kharashaadka dadban (kharashyada ku baxa ganacsashada ee aan si diyaar ah loogu aqoonsan mashruuca)
- Dhaqaale ururinta: oo ay ku jiraan ololayaasha maaliyadeed, waydiisashada hadiyadaha iyo dhaxalka, iyo kharashyada la midka ah ee loo galay si loo soo urursado raasamaal ama loo helo tabaruaad
- Canshuuraha, marka laga reebo canshuurta iibka ee alaabta iyo adeegyada
- Xayeysiiska, xiriirka dadweynaha, madadaalada, iyo kharashka madadaalada
- U doodeyaasha (lobbyists), tabaruaadka siyaasada

Imisa ayaa lacag la i siin doonaa?

Waxa laga yaabaa inaad u qalanto inaad hesho ilaa \$7,500 iyada oo ku salaysan kharashaadkaaga dhabta ah ee la xiriira abaarta. Haddii wadarta cadadka ay codsadeen dhammaan codsadyaasha xaqa u leh muddada codsiga ee hore ay ka badantahay wadarta lacagta la hayo, dhammaan codsiyada si isleeg ayaa loogu qaybin doonaa.

Goorma iyo sidee baa lacagta la ii siin doonaa?

MDA waxay uga shaqayn doontaa arjiyada sida ugu dhakhsaha badan waxayna filaysaa inay bilowdo lacag-bixinta laba toddobaad gudahooda marka ay xiranto muddada arjigu. Jadwalka wakhtigu wuxuu ku xirnaan doonaa inta codsi ee la helay muddada arjiga hore.

Haddii ay jirto maalgelin ku filan in la sii wado aqbalida arjiyada kadib xilliga codsiga ee hore, lacagahan waxaa la bixin doonaa kadib marka la howlgeliyo dhammaan arjiyada muddada hore ee codshada.

Codsadyaasha badankoodu waxay jeegag warqad ah ka heli doonaan Maamulka iyo Miisaaniyadda Minnesota (MMB). Waxa aad iska diiwaangelin kartaa MMB si aad lacagtaada ugu hesho in akoonka toos loogu soo shubo ([Direct Deposit Authorization for Electronic Funds Transfer](#)). Ogolaanshaha in Toos Akoonka loogu Shubo ee Wareejinta Lacagta ee Elektaroniga ah Fadlan ogow in MDA aysan awoodin doonin inay kaa caawiso howshan.

Maxaa dhacaya haddii ay cillad ku jirto arjigayga?

MDA waxay kugu soo ogaysiin doontaa taleefoon ama email macluumaadka ka maqan ama khaladaadka ku jira arjigaaga ama haddii arjigaaga la diiday. Waxa lagu siin doonaa todoba maalmood oo shaqo kadib marka lagu soo ogeysiyo ama kadib marka wakhtiga codsiga ee hore uu xirmo, hadba tii daambaysa, in aad ku soo saxdo cillada. Haddii aan sidxid la samaynin, arjigaaga looma tixgelin doono in la helay intii lagu jiray xilliga codsiga ee hore. Codsadyaasha la diiday waxay rafcaan ka qaadan karaan go'aanka todoba maalmood gudahooda ee ogeysiiska diidmada.

Xageen ka helayaa macluumaad dheeri ah?

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka ayaa laga heli karaa bogga internetka ee barnaamijka ama iyada oo lala xiriirayo Kooxda ADRoP (drought@state.mn.us) ama iyada oo laga soo wacayo Khadka Deeqaha 651-201-6500.

Ogaysiiska Asturnaanta

Macluumaadka lagu bixiyay qayb ka mid ah arjiga Barnaamijka Gurmada Abaaraha Beeraha ee 2021 waxa loo isticmaali doonaa in lagu qiimeeyo u qalmida codsadhaha si uu u helo lacag bixinta barnaamijkan iyo in la buuxiyo shuruudaha warbixinta maaliyadeed ee lagu dabaqi karo. Buuxinta codsigani waa ikhtiyaari; Codsadyaasha sharci ahaan loogama baahna inay MDA siiyaan macluumaadka la codsado, laakiin kaliya arjiyada la dhammaystiray ayaa la tixgelin doonaa. Iyadoo inta badan macluumaadka codsadyaashu ay bixiyaan uu sharciga Minnesota u kala saarayo inay yihiin macluumaad caam ah, macluumaadka qaar waxaa laga yaabaa in MDA sharcigu u qoondeeyo in yihiin kuwo gaar ah ama aan dadweynaha u furnayn. Xogta loo kala qoondeeyey inay tahay mid gaar ah ama mid aan dadweynaha u furnayn waxaa heli kara oo keliya shaqaalaha MDA iyo qandaraaslayaasha haysta hawl shaqo oo u baahan helitaanka xogta, iyo hay'adaha kale ee sharcigu u ogolyahay inay xogta helaan. MDA waxaa laga yaabaa in lagu waajibyo inay xogta siiso hay'adaha fulinta sharciga, Waaxda Maamulka ee Minnesota, Maareynta iyo Miisaaniyadda Minnesota, Xafiiska Hantidhawrka Gobolka, ama Xafiiska Hanti-dhawrka Sharci dejinta. Haddii ay lagama maarmaan noqoto in la bilaabo ama la difaaco dacwad sharci ah, xogta waxaa lala wadaagi karaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota iyo maxkamadaha Minnesota ama federaalka. Ugu dambayntii, xogta gaarka ah ee adiga kugu saabsan ama xogta aan dadweynaha u furnayn ee ku saabsan ganacsigaaga waxaa laga yaabaa in loo siidaayo dhinac saddexaad iyada oo loo marayo ogolaanshahaaga warqabka ah, ama iyada oo la raacayo amar maxkamadeed oo sax ah ama amar yeeris maxkamadeed oo u baahan siidayntan.

Xeerka Hay'adda Canshuuraha Dalka Qaybta 6109 ayaa wuxuu u baahanyahay codsadyaashu inay bixiyaan lambarkooda aqoonsiga cashuur bixiyaha saxda ah bixiyayaasha kuwaas oo ay tahay inay IRS u xareeyaan macluumaadka celinta. MDA waxay u isticmaali doontaa macluumaadka lagu bixiyey foomka W-9 ee codsadhaha si ay IRS ugu wargeliso lacagaha qofku uu ku helay barnaamijkan. IRS waxay u isticmaashaa lambarada ujeedooyinka aqoonsiga iyo inay ka caawiso xaqiijinta saxnaanta canshuur celinta codsadhaha. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida macluumaadka lagu bixiyay W-9 loo isticmaali karo, ka tixraac Ogeysiiska Sharciga Asturnaanta ee ku yaalla bogga 6 ee foomka W-9.